




## CUDURADA XUSUUSTA KUDHACA EE XIDIDADA DHIIGA QAADAA KA YIMAADA

Khalkhalka wareegga dhiiga maskaxda iyo xididada dhiiga qaada dhaawacyada ku yimaada ee kala duduwanii cudurada xusuusta ee ay keenaan waxaa loogu yeedhaa kuwo ka yimidey xididada dhiiga qaada (vaskulaariga) ee cudurada xusuusta. Jiradaas halisaha keenaa waxay la xidhiidhaan deegaanka iyo qaab nololeedka qofka sida dufanka jidhkiisa oo kacsan – iyo dhiig karka cabirkisa, macaanka/ sokorowga, khamrada iyo sigaar cabista.



Waxyaalaha jirada keena waxaa ka mid ah maskaxda oo naafowda, maskaxda oo dhiig ku furmo, hawada oo maskaxda ka kala go'oda iyo sidoo kale khalkhalka ku yimaada wareegga dhiiga ee maskaxda. Ambaqaadka jiradu qofba waa si waxayna ku xidhan tahay marba qeybta uu dhaawacu maskaxda ka gaadhey. Khalkhalada ku yimaada wareegga dhiiga ee maskaxsaaya hada ugu badan cudurada maskaxda sababaha keena cudurka Alzeimerka ka dib. Sida qaalibka ah sababtu markaa waxa weeyaan cudurada ku dhaca xididada maskaxda kuwa dhiiga qaada ee yaryar.

HOWLAHA  
CAQLIYEYAN  
EE SAREEYA

QOLOFTA MASKAXDA EE DHAQDHAQAQA

QOLOFTA MASKAXDA EE DAREENKA

XIRFADAH GACMAHA

QOLOFTA MASKAXDA  
EE ARAGGA

QEYBTA HADALKA  
QEYBTA MAQLAKA  
QEYBTA XUSUUSTA

Cudurada xusuusta ee ka yimaada xididada dhiiga qaada waxaa loogu qeybiyaa noocyoo badan, sida isbedeladani ma maskaxda ayey kaga badan yihiin wareegga lakabka qolofta mise waa maskaxda qeybeheeda hoose sida walaxda cad.

### Calaamadaha jiradan lagu gartaa waxay kala yihin



Dhawaaca ku yimaada qeybta bidixda ee maskaxdu wuxuu keenaan khalkhal luqadaha ah, halka kan midigta ku yimaadaana uu garashadu ku adkeeyo qofka. Dhaawacyada ku yimaada qeybaha maskaxda gunteeeda ku jiraana inta badan waxay keenaan awoodda waxqabadka qofka oo gaabisa. Caajisnimo, awoodda bilaabidda waxqabadka oo diciifta iyo garashada xaaladaha oo ku adkaataa waa calaamadaha caadiga u ah iyo xusuus adkaanshaha iyo sidoo kaleba khaas ahaan waa kuwo caadi u ah dhibaatada raadinta xusuusta.



Caajisnimo, awoodda bilowga waxqabadka oo diciifta garashada xaaladaha oo ku adkaataa waa calaamadaha caadiga ah iyo xusuus ku adkaanshaha iyo sidoo kale xusuus ku adkaanshaha khaas ahaan waa kuwo caadi u ah dhibaatada raadinta xusuusta.




Jiradan waxaa daba socon kara diiqadeysnaan iyo niyad jabsanaan. Sidoo kale dareen nuglaansho iyo niyadiisa oo isbedbedesha waa calaamadaha caadiga u ah. Cudurada maskaxda ee ay keenaan xididada dhiiga qaada xusuustoodu wey uga keydsanaan badan tahay kuwa ay keenaan cudurada Alzeimerku keenaan. Awoodda waxqabadku wey isbedbedeshaa sidoo kalena waxaa laga yaabaa in ay dhacdo in xaalda dareenkiisa uu kor ku kacdo



## JIHEEYAH A DARYEELKA WANAAGSAN EE CUDURADA XUSUUSTA

Qaab nololeed caafimaad qaba iyo haddii loo baahdo wax ka bedelid qaab nololeedka ah in la sameeyaa waa qeybta ugu wanaagsan ee jiradan daryeelkeeda ah. Waxaa kale oo muhiim ah in lagu taageero sii wadashada nolosha uu jecel yahay inuu qofku ku nolaado oo qaabab kala duduwan ah.



Daryeelka jirooyinka xusuusta ee ay keenaan xididata dhiiga qaada waa in diirada la saaro sababaha keeney iyo waxa halista ku keenaya iyo in sidoo kale laga daryeelo wixii jirooyin ah ee suurtogal ah. Cudurada xusuusta ku dhaca daryeelkooda wanaagsani wuxuu ka kooban yahay qeybahan soo socda: jimicsi, hurdo ku filan, cunto nafaqo leh, bad qabka wadnaha, xidhiidhka bulshada, firfircoonda maskaxda iyo wuxuu ku maararoobo, nolol bilaa maandooriye ah iyo in loo daweeoyo marba sidii dawooyinka loogu baahdo.

Lähteet:

[www.muistiliitto.fi](http://www.muistiliitto.fi)  
[www.terveyskirjasto.fi](http://www.terveyskirjasto.fi)  
[www.kaypahoito.fi](http://www.kaypahoito.fi)  
Kuva ja taide: Karen Cipre  
[karencipre.deviantart.com](http://karencipre.deviantart.com)